Trinity College Dublin
Coláiste na Tríonóide, Baile Átha Cliath
The University of Dublin

World Vision

HEARTS – Macluumaad ku saabsan Cilmi-baarista

Salaam!

Bulshadaada waxaa loo xushay inay ka qayb qaadato mashruuc cusub oo xiiso leh oo la yiraahdo ‘Bogsiin & Awood-siinta – Horumarinta adkaysiga iyada oo loo marayo daryeel ruuxi ah’, kaas oo loo yaqaan HEARTS.

HEARTS waa barnaamij ka caawiya hagaajinta caafimaadka maskaxda ee bulshadaada si waafaqsan waxbarashada iyo dhaqanka Islaamka. Waxaa hoggaaminaya xubno ka tirsan bulshada, taasoo micnaheedu yahay in dadka ka socda Dangorayo la tababari doono si ay u hoggaamiyaan habka HEARTS oo ay u taageeraan dadka kale ee bulshada dhexdeeda.

Qayb ka mid ah HEARTS, waxaa sidoo kale socda cilmi-baaris lagu fahmayo sida barnaamijku u shaqeynayo iyo sida loo sii wanaajin karo si uu uga faa’iideeyo bulshadaada iyo bulshooyinka kale ee Muslimiinta mustaqbalka. Cilmi-baaristan waxaa hoggaaminaya Trinity College Dublin, iyadoo la kaashanaya World Vision Ireland iyo World Vision Somalia.

Maxay tani adiga kugu micna tahay?

Waxaan ku weydiinaynaa inaad akhrido foomkan oo aad go’aansato haddii aad rabto inaad ka qayb qaadato cilmi-baarista la xiriirta mashruuca HEARTS. Ka qayb qaadashada cilmi-baaristan waxay ka dhigan tahay in kooxda cilmi-baaristu ay

- Ururinta macluumaad kaa ku saabsan waayo-aragnimadaada ku aaddan hirgelinta habka HEARTS.

- Isticmaalka macluumaadkan si loo barto sida mashruucu u socdo iyo sida loo sii wanaajin karo.

Waxyaabaha muhiimka ah ee la ogaado

- Waxaan kaliya isticmaali doonaa macluumaadkaaga haddii aad ogolaato.
- Jawaabahaaga waa la ilaaliyaa oo si gaar ah ayaa loo xafidaa. Ma jiro qof ka baxsan kooxda cilmi-baarista oo ogaan doona jawaabaha aad bixisay.
- Waxaad ka bixi kartaa ka qayb qaadashada cilmi-baarista wakhti kasta haddii aadan rabin inaad sii waddo ka qayb qaadashada. Ma jiri doonaan wax cawaaqib xun ah haddii aad go’aansato inaad joojiso ka qayb qaadashada.

- Waxaad weli ka mid noqon kartaa mashruuca HEARTS xitaa haddii aadan rabin inaad ka qayb qaadato cilmi-baarista.

Macluumaadka Ardayga	
Yaan nahay?	Waxaan nahay koox ka socota Trinity College Dublin, World Vision Ireland, iyo World Vision Somalia. Magacyadeennu waa: ● Charles Zemp (Trinity College Dublin) ● Dr Frédérique Vallières (Trinity College Dublin) ● Dr Kristin Hadfield (Trinity College Dublin) ● Esperanza Escorza (World Vision Ireland) ● Laurene Barlet (World Vision Ireland) ● Maurice Sadlier (World Vision Ireland ● Abdinajib Hirsi (World Vision Somalia) ● Mzondi Ziba (World Vision Somalia) ● Mohamed Isse (World Vision Somalia) Shaqadeennu waa inaan baarno HEARTS si aan u fahanno sida uu u shaqeeyo iyo sida loo sii wanaajin karo.
Waa maxay HEARTS?	HEARTS waa barnaamij cusub oo taageero caafimaadka maskaxda ah oo ku saleysan kooxo, kaas oo ka socda bulshada Dangorayo. HEARTS waxa uu ujeedkiisu yahay in uu taageero caafimaadka maskaxda ee xubnaha bulshada si waafaqsan diinta Islaamka, isagoo isku daraya dhaqamada Islaamka iyo qaybaha faragelinta cilmi-nafsiga (psychological interventions). Habka HEARTS wuxuu ka koobnaan doonaa kulammo kooxeed (5–10 qof), kuwaas oo dhici doona hal mar toddobaadkii muddo 5–6 toddobaad ah. Kulan kastaa wuxuu socon doonaa 1.5 ilaa 2 saacadood, waxaana fududeyn doona laba qof oo tababaran oo ka socda bulshadaada, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha diinta. Kooxaha HEARTS waxaa loo kala sooci doonaa rag iyo dumar (kooxo kala duwan).
Maxaa la iiga codsaday inaan ka qayb qaato?	Waxaa lagugu martiqaaday inaad ka qayb qaadato cilmi-baaristan sababtoo ah waxaad ka mid tahay bulshada Dangorayo, waxaana laga yaabaa inaad xiisaynayso inaad noqoto qof fududeeya (facilitator) HEARTS, isla markaana aad ka qayb qaadato cilmi-baaristan adigoo nala wadaagaya waayo-aragnimadaada HEARTS iyo sida uu kuu saameeyay. Waxaan oggolaansho ka haysannaa Guddiga Anshaxa (Ethics Committee) ee Trinity College Dublin iyo Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland si aan u fulino cilmi-baaristan. Tani waxay ka dhigan tahay in aan hubinno in wax kasta oo aan ku weydiineyno ay ammaan kuu yihiin. Ma la wadaagi

	doonno wax kasta oo aad noo sheegto qof kale, haddii aanan u malayn in adiga ama qof kale uu khatar ku jiro.
Maxaan sameyn doonaa haddii aan ka mid noqdo?	Waa tan waxa dhici doona haddii aad go'aansato inaad ka qayb qaadato cilmi-baaristan: ● Ka hor inta aanad ka qayb galin kulamada tababarka HEARTS, waxaad buuxin doontaa su'aalo ku saabsan aqoontaada, aragtidaada, iyo dhaqamadaada la xiriira HEARTS, iyo sidoo kale kartidaada ku aaddan hirgelinta habka HEARTS. Su'aalahan waxay qaadan doonaan ugu badnaan 30 daqiiqo in la dhammaystiro. ● Waxaad isla su'aalahaas buuxin doontaa saddex jeer oo kale: ka dib marka aad ka qayb qaadato tababarka HEARTS, iyo ka dib marka aad qabato kulamada HEARTS ee laba kooxood (cohorts) oo ka qaybgalayaal ah. ● Waxa kale oo lagugu martiqaadi doonaa inaad ka qayb qaadato wareysi (interview) ka dib marka ay dhammaadaan kulamada HEARTS. ● Wareysigu wuxuu ku weydiin doonaa waayo-aragnimadaada ku saabsan habka HEARTS, oo ay ku jiraan waxa aad ka heshay, waxa aadan ka helin, iyo sida aad u malaynayso in HEARTS loo sii wanaajin karo. ● Wareysigu ma qaadan doono wax ka badan 1 saac, waxaana si fool-ka-fool ah u qaban doona shaqaale tababaran oo ka tirsan World Vision Somalia, waxaana lagu qaban doonaa meel gaar ah oo ku habboon. **Haddii aan duubno:** ● **Cod** – Iyada oo qayb ka ah wareysiga, waxaa suurtogal ah inaan duubno codkaaga. Keliya kooxda cilmi-baarista ayaa dhageysan doonta, waxaana tirtiri doonnaa duubista codka muddo bil gudaheed ah.
Macluumaadkee iga (xogtayda shaqsiyeed) ayaa loo adeegsan doonaa cilmi-baaristan?	Waxaan isticmaali doonaa macluumaadka soo socda ee adiga kugu saabsan: da'daada; jinsigaaga; doorkaaga bulshada (haddii uu jiro); aqoonta, aragtida, iyo dhaqamada aad iskaa u sheegtay ee la xiriira caafimaadka maskaxda;

	heerka kartida aad iskaa u sheegtay ee ku aaddan fududeynta HEARTS; heerka aad iskaa u sheegtay ee ku saabsan natiijooyin kala duwan oo la xiriira diinta Islaamka; foomka oggolaanshaha; duubista codka wareysigaaga; iyo qoraalka (transcript) ee wareysigaaga.
Yaa heli doona macluumaadkayga?	Keliya xubnaha koxda cilmi-baarista (ee kor ku qoran) ayaa heli doona macluumaadkaaga.
Maxaa ku dhici doona macluumaadkayga?	Macluumaadka aad ku wadaagto su'aalaha iyo wareysiyada si gaar ah ayaa loo ilaalin doonaa. Si loo ilaaliyo sirtaada, waxaa lagu siin doonaa lambar gaar ah (code). Magacaaga kama muuqan doono wax su'aalo ah ama qoraallada wareysiyada (transcripts). Macluumaadkaaga si ammaan ah ayaa loo kaydin doonaa, si gaar ah ayaa loo ilaalin doonaa, waxaana kaliya heli doona annaga (shakhsiyaadka lagu magacaabay bilowga dukumeentigan). Waxa kaliya ee ka reeban waa haddii aad la wadaagto macluumaad muujinaya in adiga ama qof kale uu khatar ku jiro. Macluumaadka aad bixiso waxaa loo isticmaali karaa maqaallo cilmiyeed iyo warbixino si loo caawiyo dadka kale inay wax ka bartaan HEARTS. Macluumaadkaaga mar walba waxaa loo soo bandhigi doonaa si aan lagu aqoonsan karin qofka aad tahay.
Waa maxay saldhigga sharciga ah ee loo isticmaalo macluumaadkayga?	Sababta sharciga ah ee loo farsameynayo xogta waa Qodobka 6(1)(e) iyo Qodobka 9(2)(j) ee GDPR. Waxaan kaliya u isticmaali doonnaa macluumaadkaaga mashruucan cilmi-baarista (iyo, haddii aad oggolaato, cilmi-baaris mustaqbalka la xiriirta mashruucan).
Waa maxay xuquuqdayda ee hoos timaada sharciga ilaalinta xogta?	Waxaad xaq u leedahay: ● inaad diiddo isticmaalka xogtaada shaqsiyeed ama isticmaal kasta oo dheeraad ah; ● inaad codsato helitaanka xogtaada shaqsiyeed oo aad hesho nuqul ka mid ah; ● inaad codsato in la saxo ama la tirtiro xogta shaqsiyeed ee khaldan;

	● inaad codsato in la xaddido isticmaalka xogtaada shaqsiyeed. ● inaad codsato in la tirtiro xogtaada shaqsiyeed. Sharci ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad adeegsato xuquuqaha kor ku xusan ee la xiriira xogtaada shaqsiyeed, ilaa ay codsigaaga ka dhigto mid aan suurtagal ahayn ama aad u adag in cilmi-baarista la fuliyo. Tusaale ahaan, haddii cilmi-baaristu ay ku dhowdahay in la daabaco, waxaa laga yaabaa in aynaan awoodin inaan tirtirno xogta, maadaama ay saameyn ku yeelan karto natiijooyinka. Si aad u adeegsato xuquuqahan, waxaad la xiriiri kartaa Charles Zemp (zempc@tcd.ie), Abdinajib Hirsi (Abdinajib_Hirsi@wvi.org) ama Sarkaalka Ilaalinta Xogta ee Trinity College Dublin (dataprotection.tcd.ie).
Macluumaadkayga ma loo isticmaali doonaa cilmi-baaris mustaqbalka?	Oggolaanshahaaga, waxaan jeclaan lahayn inaan sii hayno macluumaadka laga soo ururiyay adiga si loo isticmaalo cilmi-baaris mustaqbalka oo la xiriirta HEARTS. Waxaad ka laaban kartaa oggolaanshahaaga isticmaalka mustaqbalka wakhti kasta.
Maxaan uga qayb qaadanayaa?	Macluumaadkaaga wuxuu naga caawin doonaa inaan baranno sida si ka wanaagsan loo taageeri karo adiga, xubnaha kale ee bulshadaada, iyo xubno ka tirsan bulshooyinka kale ee Muslimiinta.
Miyaan beddeli karaa go'aankayga?	Haa, waad joojin kartaa wakhti kasta. Kaliya u sheeg qof ka tirsan kooxda World Vision Somalia. Qofna kama xumaan doono mana lagu weydiin doono sababta.Haddii aad noo sheegto in aadan rabin inaad sii ka qayb qaadato, wareysiyada la duubay ama su'aalaha (surveys) aad buuxisay waxaa laga tirtiri doonaa diiwaannada kooxda cilmi-baarista. Waxaad weli ka qayb geli doontaa tababarka HEARTS iyo kulamada HEARTS. Haddii aad u malaynayso in macluumaadka (su'aalaha ama wareysiyada) ay khaldan yihiin, fadlan kala hadal kooxda cilmi-baarista si loo saxo ama wax loogu daro.
Miyaan khasab igu ah inaan ka qayb qaato?	Maya. Ma aha inaad ka mid noqoto haddii aadan rabin. Waa gabi ahaanba doorashadaada, mana ka xumaan doonno haddii aad diido. Haddii aadan rabin inaad ka qayb qaadato cilmi-baaristan, waa ok. Waxaad weli ka qayb geli kartaa tababarka HEARTS iyo kulamada HEARTS.

Ma jiraan khataro ku jira ka qayb qaadashada?	Waxaa jira khatar yar oo ah in ka qayb qaadashada cilmi-baaristan ay keeni karto inaad dareento raaxo-darro nafsiyeed (psychological discomfort). Taageero caafimaadka maskaxda oo dibadda ah ayaa diyaar kuu noqon doonta haddii aad u baahato inaad hesho.
Maxaan hadda sameeyaa?	Fadlan su'aalahaaga oo dhan weydii kooxda World Vision Somalia. Haddii aad rabto inaad ka qayb qaadato, fadlan saxiix foomka oggolaanshaha ee lagu siiyay, taasoo ka dhigan inaad oggolaatay inaad ka qayb qaadato cilmi-baaristan.
Su'aalo?	Waxaad nala soo xiriiri kartaa: Charles Zemp (zempc@tcd.ie) Esperanza Escorza (esperanza.escorza@worldvision.ie) Abdinajib Hirsi (Abdinajib_Hirsi@wvi.org) Mzondi Ziba (mzondi_ziba@wvi.org) Mohamed Abdi Isse (mohamed_isse@wvi.org)